

KU BIIR WADAHADALKA

SU'AALO

info@waterfrontseattle.org
206.499.8040

BOOQO MAREEGTADEENNA

www.waterfrontseattle.org

KAGA QAYBGAL BARTA INTERNET-KA

f waterfrontseattle
waterfrontSEA
waterfrontSEA



WADA-SHAQEYN

Barnaamijka Biyo-xigeenka Magaalada Seattle waa dedaal iskaashi ku dhisan oo ay wada sameeyeen Magaalada Seattle, ururrada madaniga ah iyo dadweynaha.



Seattle

Office of the Waterfront
and Civic Projects

Wuxuu u horseedaya Waterfront Seattle, oo si dhow ugala shaqeynaya hoggaamiyeasha madaniga ah, daneeyayaasha iyo guud ahaan dadweynaha Seattle in la abuuro biyo-xigeen loogu talagalay dhammaan dadka.

Wax badan ka ogow

waterfrontseattle.org



Urur aan faa'iido doon ahayn oo iskaashi kala yeesha Xafiiska Mashaariicda Madaniga ah iyo Kuwa Biyo-xigeenka, ururrada la-hawlgalla iyo guud ahaan bulshada in la dhiso wacyiga Waterfront Seattle, la sameeyo lacag ururin iyo in hormuur laga noqdo dayactirka muddadad dheer iyo barnaamijyada.

Saaxiib la noqo

friendsofwaterfrontseattle.org

BULSHADA

Kumanaan isugu jira faallooyin iyo fikrado ay dadweynaha dhiibteen ayaa waxaa lagu daray himilada Banaamijka Biyo-xigeenka Waterfront Seattle.

La xiriir


info@waterfrontseattle.org

MAALGELINTA

Barnaamijka Biyo-xigeenka Seattle ayaa la maalgeliya iyadoo loo marayo iskaashiyo ka dhaxeeya Magaalada Seattle iyo bulshada, ururrada madaniga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Barnaamijka si buuxda ayaa loo maalgeliyay.

ILAHA MAALGELINTA

Deeqsiin
\$110M



WADARTA= \$737M

DEGMADA HORUMARINTA DEGAANKA

Iyadoo qayb ka ah istiraatijiyadda maalgelinta, ayaa Magaalada waxay sameysay Degmada Horumarinta Degaanka ah (LID) sannadkii 2019. LID waa qalab ay milkiiliyasha guryaha u soo maraan wax ku biirrinta qayb ka mid ah kharashaadka sii wanaajinta Waterfront Seattle oo ku saleysan kororka ku yimaada qiimaha hantidooda. LID ayaa waxaa la soo gebogabeeyay bishii Juunyo 2021.

Si aad wax badan uga oggaato hannaanka LID booqo:
waterfrontseattle.org/lid

Luuulyo 2021




BIYO-XIGEENKA CUSUB EE SEATTLE AYAA QAAB YEELANAYA

Labaatan eykar oo beero cusub iyo meelo dadweyne ah ayaa la dhisay, oo ay ku jiraan beerta promenade ee cusub oo ku teedsan Gacan-biyyodka Elliot iyo jid cusub oo in yar dhulka ka kacsan oo ku yaalla Waddada Alaskan Way. Dekedyarada 62, taas oo dib loo dhisay lana furay Deyrtii 2020, iyo Dekedyarada 58 waxay taageeri doonnaan munaasabada bulshada, qoysaska iyo madadaalada firfircooni. Beer cusub oo sare loo qaaday oo loo yaqaanno 'Overlook Walk' ayaa waxaa ay Suuqa Pike Place ku xiri doontaa biyo-xigeenka waxayna taageeri doontaa ballaarinta meesha kallunka iyo xayawaan-badeedka lagu xannaaneeyo ee Seattle Aquarium. Jidodka Bari-galbeed (East-west) ee ku yaalla Fagaaraaha Pioneer, marinka Pike iyo Pine iyo Belltown ayaa la sii hagaajin doonaa, taas oo sii wanaajinaysa gaarista marka laga yimaada xaafadeenna magaalada hoose loona soo socda Gacan-biyyodka Elliott Bay.

**SAHAM
BIYO-XIGEENKA
MUSTAQBALKA**



2010	Barnaamijka Waterfront Seattle ayaa bilaabanaya	
2012	Nakh-shadda fikradda ah iyo Qorshaha Istiraatijiga ah ee Biyo-xigeenka ee ay ayideen Golaha Magaalada	
2014		
2017		
2018	Dib-u-dhiska Dekedyarada 62 ayaa bilaabanaya	
2019	Adeegyada laga soo raray buundada	
2020	Jidka dhulka hoostiisa mara ee SR 99 ayaa la dhammeeyay	
2021	Burburinta buundada ayaa bilaabatay	
2022	Shaqada Jidka Columbia ayaa bilaabanaya	
2024	Dhismaha Waddada Alaskan Way ayaa bilaabanaya	
	Burburinta buundada ayaa dhammaanaysa	
	Jidka Columbia ayaa gaadiidka loo furayaa	
	Dib-u-dhiska Dekedyarada 58 ayaa bilaabanaya	
	Dhismaha Buundada Jidka Union ayaa bilaabanaya	
	Meesha ka-saaridda Dekedyarada 58 ayaa dhammaanaysa	
	Dhismaha Buundada Jidka Marion ayaa bilaabanaya	
	Dhismaha waddada Overlook Walk ayaa bilaabanaya	
	Waddada cusub ayaa la dhammeeyay waxaanna loo furay gaadiidka	
	Dib-u-dhiska Dekedyarada 58 ayaa bilaabanaya	
	Laymanka gaadiidka ee cusub ayaa bixinaya isku-xirrada gaadiidka ee muhiimka ah marka laga yimaado biyo-xigeenka loona soo socda bartamaha magaalada hoose	

WAXAA HAGA BULSHADA

Barnaamijka Seattle ee Biyo-xigeenka ayaa ku bilowday himilo bulsho ahaan si meesha looga saaro Buundada Waddada Alaskan Way iyo si dib la isugu xiro magaalada iyo biyo-xigeenka. Tan iyo 2010, in ka badan 10,000 qof ayaa ka qaybgaley kullano himilada lagu dejinayo, shirar bulsho, boqashooyin socod lagu tagayo meelaha, dib-u-eegisyada deegaanka iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah oo lagu qaabeynayo nakh-shadda aynu hadda dhisayno.

HADDA DHACAYA

Dhismaha biyo-xigeenka cusub ayaa socda. Buundada Waddada Alaskan Way in sannadkii 2019 meesha laga saaro ayaa noo sahashay in aannu dhisno beeraha cusub, dhabbyaasha iyo jidodka in yar dhulka ka kacsan ee booskeeda geli doonna. Deyrtii 2019, ayaa waxaan bilownay in aan dhisno Waddada cusub ee Alaskan Way waxaanna soo gebogabeynay qaar ka mid ah waddada cusub, oo aad maanta gaari ku waddo. Dhismaha Biyo-xigeenka Seattle (Waterfront Seattl) ayaa dhammaan doonna dabayaaqada 2024.

DHISMAHA

Waxaa naga go'an in aan biyo-xigeenka ka dhigno mid furan oo sii kobcaya inta uu dhismuhu socdo.

Waa kuwan waxa aad filan kartu inta lagu guda jiro dhismaha:

- Gelidda ganacsiyada, dadka degaanka iyo dhammaan hababka lagu socdaalo
- Meelaha baabuurta la dhigto ee magaalada hoose oo heerkoodu hooseeyo
- Soonayaasha shaqada iyo jidodka kale oo looga weecdo oo la isuduway dhismaha kale ee ka socda degaanka
- War-isgaarsiin cad, joogto ah si aad xog-ogaal u noqoto

[https://waterfrontseattle.org/
construction/construction-overview](https://waterfrontseattle.org/construction/construction-overview)



La soco wararkii ugu dambeeyay dhismaha hadda ka socda iyo kuwa mustaqbalka laga hirgelin doonno degaanka biyo-xigeenka.

BIYO-XIGEENKA SEATTLE EE LOOGU TALAGALAY DHAMMAAN

Biyo-xigeenka cusub ee Seattle ayaa wuxuu yeellan doonaa meelo dadweyne badan jooga oo nashaad uu ka jiro oo dib isugu xiraya magaalada iyo Gacan-biyoodka Elliott Bay. Horumarinnada, oo ku fidinnaya biyo-xigeenka laga bilaabo Fagaaraaha Pioneer ilaa Belltown, ayaa waxaa ka mid noqon doonna beero cusub, xariiq badda oo wanaagsan, aragtiyo, farshaxan dadweyne, iyo gaaridda wanaagsan oo ay ku jiraan jid ballaaran, jidka ay dadka maraan, iyo isku-xirrada jidadka baaskiilka. Biyo-xigeenka wuxuu noqon doonaa meel si firfircoo loo maareeyo oo ay barnaamijyo ka socdaan, kor-u-qadaya madadaallada, farshaxanka, waxbarashada, socodka, nasashada, iyo isku-xirrada wanaagsan ee xaafadaha ku xeeran.



Ogow riwaayado cusub, fan, bandhigyo faneed, ciyaaro, tafaariiq degaanka iyo kuwo kale oo ay soo abaabulaan Saaxiibada Waterfront Seattle

10 DIB-U-DHISKA DEKEDYARADA 58

U dabbaaldeg nakh-shad la joogteyn karo, laga bilaabo Derbiga badda ee dib loo dhisay ee taageera kalluunka salmon ee hajaaryaa ilaa kaabayasha biyaha duufaanta ee cagaaran ee hal-abuurka leh

Isku soo urura, nasta oo raaxaysta aragtiyada Overlook Walk, oo noqon doonta sidi buundada dadka lugeynaya ee inta u dhaxeyso Suuqa Pike Place iyo biyo-xigeenka, wuxunna ku xiraya baltaarinta Ocean Pavilion cusub Meesha Kalluunka iyo Xayawaan-Badeedka Lagu Xannaaneeyo ee Seattle.



EEG
CIYAAR



15 DIB-U-DHISKA DEKEDYARADA 62

- Degaanka Barnaamijka Waterfront Seattle
- Mashaariicda la xiriira
- 1 Waddada Jidka Tareenka
- 2 Waddada New Alaskan + Waddada Elliott
- 3 Horumarinta muuqaalka jidka ee Fagaaraaha Pioneer
- 4 Jidka Columbia horumarinta muuqaalka jidka
- 5 Jidka Marion buundada dadka lugeeya ay maraan
- 6 Dib-u-dhiska derbiga badda
- 7 Isku-xirka Jidka Seneca
- 8 Beerta Promenade
- 9 Jaranjarooyinka iyo wiishka Jidka Union
- 10 Dib-u-dhiska dekedyarada 58
- 11 Dhabbaha baaskiilka
- 12 Ballaarinta meesha Kalluunka iyo Xayawaannada Lagu Xannaaneeyo ee Seattle
- 13 Beerta sare loo qaadey ee Overlook Walk
- 14 Horumarinta muuqaalka jidka Pike + Pine
- 15 Dib-u-dhiska dekedyarada 62
- 16 MarketFront-ka Suuqa Pike Place
- 17 Fidinta Beerta Jidka Bell

